

ACTION INFORMATION SHEET

Ma rabta in aad ilmahaaga caawiso? Waa in aad ka qayb qaadataa!

(Want to Help Your Child Succeed in School? Be Involved!—Somali Version)

Waalidku dhamaan waxa ay jecelyihiin in ilmahoodu kuguulaysto skuulka. Dareeqa hore ee waalidku yeeli karaan waa in ay ka qayb qaataan waxbarashada ilmahooda. Marka ay waalidku ka qayb qaataan, caruurta way ku guulaystaan. Ardayda waxbarashadooda ayaa koradha, natiijo fiican ayay keenan, iyo iyaga oo iskuulka aada had iyo jeer.

Waxa aad samayn kartaa waxyaabo badan si uu ilamhaago ugu fiicnaado iskuulka. Waxa ka mid ah!

Ka caawi hor umarka labada qaybood ee waxbarashada

- **Xirfadaha iyo Natiijada:** imtixaanada iyo natiijaduba muhiim ayay uyihiin hor umarka ardayga. Macalimiintu waxa ay ardayda ka caawiyaan xaga xirfadaha iyo natiijadaba.
 - o Ku dheeri gali ilmahaaga in uu casharka loo baahanyahay in guriga lagaga shaqyo dhamystiro. Guriga oo lagaga shaqeyo casharada waxa ay keentaa in uu ilmuhu wax koradhsado, in uu fahmo bato, iyo in ay nolasha ku guulaystaan marka ay waynaadaan.
 - o Waa in aad usamaysaa meel fiican oo ilmuhu kaga shaqeyo casharada loo bahanyahay in guriga lagaga shaqeyo iskuna day in sidii aad u caawin lahayd.
 - o Isku day in aad wax ka fahamto kaadhka warbixinta lana kulan macalinka. Adiga iyo macalinku waxa aad ka wada hadli kartaan hor umarka ilmaha iyo wixii dhibaato ah ee jira si looga hortago.

- o Hadii ilmahaagu ubaahanyahay waxqabad dheerad ah xaga xirfada iyo natiijada, kulan ka codso macalinka. Waxa jira meelo badan oo waxqabad laga heli karo.
- **Dabciga iyo Dhaqanka:** Ardayga dareenkiisa iyo sida iskuulka u arko ayay ku xidhantahay hor umarkiisu. Waxa aad ilmahaaga ka caawisaa in:
 - o Ilmuhu isku kalsoonado
 - o Waa in aad fahamsiid in waxbarashadu ay muhiim tahay
 - o Ka caawi ilmahaaga in uu dulqaadashada barto
 - o Adiga oo isticmaalya xiriika aad la leedahy macalimiinta, tus ilmahaaga in ay jirto hab ixtiraamleh oo waxa aad rabto maclinka loogu sheegan karaa in ay jirto. Xirfadahaas oo kale waa in aad bartaa.

Waa in aad barataa habka aad u caawin karto ilmahaaga si uu hor umar ugaadho.

Waxa hoos ku qoran afar dariiq oo aad isticmaali karto:

- **Dheeri galin**
 - o Waa in aad ilamahaaga fahansiisaa in ay waxbarashado muhimm tahay.
 - o Isku day in aad wakhti u hurtid (volunteer) iskuulka
- **Tusaalo u noqo ilmahaaga (Modeling)**
 - o Ilmahaago haku arko adiga oo wax baranaya
 - o Tus ilmahaaga adiga oo mashruuc adag dhamays tiray.
- **Xoojin (Reinforcement)**
 - o Ku amaan ilmahaaga dadaalka waxabarashada uu muujiyo.
 - o Waydii ilmahaaga sida skuulku yahay maalin walba. Kalahadal wixii dhib ah ee jira.
- **Toosin iyo Tusaalo (Instruction).**
 - o Kala shaqee ilamhaaga duruusta loogu talagay in guriga lagaga shaqeyo.

- o Tusaalo unoqo “nolol maalmeedka” sida hawl culus oo aad dhamays tirta, adiga qaladkaaga waxa ka barta, iyo mas’uuliyadaada oo aad kasoo baxdidi.

Ma ubaahantahay fikrado dheeraad ah? Waxa aad soo wacdaa xarunta waalidka Minnesota

Xarunta waalidka Minnesota waxa ay waalidka ka caawisaa sida ay waalidku ay qayb uga qaadan karaan waxbarashada ilmahooda. Waxa kale oo ay dheeri galisaa sida bulshadu uga qayb qaadan lahaayeen sida ay caruurta dhamaan ugu diyaar garoobaan uguna gulaystaan waxbarashada.

Shaqaalaha xarunta ee la shaqeyaa umada afafaka kala gadisan ku hadla ayaa kaaga jawaabi kara wixii ku saabsan waxbarashada iyo iskuulada. Waxa kale oo ay bixiyaan tababar (Workshop) ku saabsan arimaha waxbarashada sida sharciga loo yaqaan No Child Left Behind, ka qayb qaadashada waalidka xaga waxbarashada (Parental Involvement). Waana lacag la’aan.

Soo wac talafoonka ah 952-838-900 ama 800-53-PACER (oo lacag la’aan ah Minnesota gudaheed) se aad uheshid fikrad ah sidii aad ilmahaaga uga caawin lahayd xaga waxbarashada. Waxa kale oo aad warbixin dheeraad ah ka heli karta hadii aad booqato www.PACER.org/mpc.

Minnesota Parent Center, oo ah barnaamij ka mid ah PACER Center, inc., ayaa waxa bixiya Dhaqaalaha Wasaarada Waxbarashada.

PACER waxa weeyaan urur gobolka Minnesota dhamaan caawiya oo lacag la’aan ah. Waxa nyna tageeraan xuquuqda ardaydu uleeyihiin xaga waxbarashada. Ardayga laxaadka la’a iyo kuwa kaleba. Waxa ay waalidka ufdiyaan tababar (Workshop), waxqabad shaqsiyeed, iyo warbixin qoraal ah, iyo waxyaabo kale oo badan.